

Hawsha:

Hawsha Le Monde waa in uu carruurta wax ku baro jawi habka waxbarida Faransiiska oo sharfaya dhaqanka waxbarashada ugu wanaagsan ee caalamiga ah iyo horumarinta ardayda raba in ay wax ogaadaan, yeeshaan fikir wanaagsan, xiriir sameeyaan, isla markaana daryeel leh.

Hawsha Habka Waxbarida Faransiiska ee Dugsiga Dadweynaha ee Madaxa bannaan ee Le Mende qofna takoori mayso iyadoo ay la xiriirto asalka, caqiigada, midabka, dalka laga soo jeedo, jinsiyadda, da'da, xaalada guur, dookha galmo oo ay ku jiraan is-aqoonsiga qofka, ama aan ahayn barnaamij la xiriira naafanimoo oo ardayda la siinayo barnaamijyo waxbarasho, hawlaha dhanka manhajka ah, iyo fursaddo shaqo.



Le Monde French Immersion
2044 E Burnside
Portland, OR 97214
Telefoonka: 503-467-7529
Fax-ka: 503-548-2190
E-mail-ka:
info@lemondeimmersion.org

**Ku soo Dhowow
Hawsha Habka
Waxbarida Faransiiska
ee Dugsiga
Dadweynaha ee
Madaxa bannaan ee
Le Mende**

**"Dugsiga dadweynaha ee habka
waxbarida Faransiiska ee kaliya
Portland leedahay"**



Le Monde French Immersion
2044 E Burnside
Portland, OR 97214
503-467-7529
info@lemondeimmersion.org
www.lemondeimmersion.org



XAQIIQOOYIN DEGDEGA AH:

- Waxaa la furay 2012
- Wuxuu u adeegayaa fasallada K-7 (kordhaya oo gaaraya K-8)
- Jawiga Habka waxbarida Faransiiska ee Buuxa

Ma daneynaysaa in aad isqorto?

Wixii macluumaad ah
ee dheeraad ah, naga soo
wac 503-467-7529 ama
booqo website-ka:
www.lemondeimmersion.org

Bixinta Barnaamijka

- Habka waxbarida Faransiiska oo buuxa, manhaj dhammeystiran
- Jawi waxbarasho wax loo fiirsanayo oo badbaado leh
- Macallimiin dadaal, hal-abuur iyo daryeel leh
- Jawi ixtiraam leh oo loogu talagalay fikrado iyo aragti kala duwan
- Dhaqan qiimeeya adeega dadweynaha iyo iskaashiga bulshada
- Bixinta farshaxan, muusik iyo waxbarashada jirka oo toddobaadkii la helayo

Waa maxay dugsiga madaxa bannaani?

Dugsiyada madaxa bannaan waa dugsiyo dadweyne oo loogu talagalay in ay bixiyaan barnaamijyo casri oo leh falsafado waxbarasho oo gaar ah iyo/ama bixinta tusaalooyin laga helayo fursado dheeraad ah oo loogu talagalay ardayda iyo qoysaska ka tirsan nidaamka dugsiga dadweynaha. Dugsiyada madaxa bannaani waa urur ah 501(c)3 oo qandaraas la gala Dugsiyada Dadweynaha Portland si ay u damaanad qaadaan isla markaana u dhowraan madax bannaani heerkoodu sareeyo taasi oo lagu beddelanayo isla xisaabtanka la kordhiyay. Dugsiga madax bannaan waxaa lagu maamulaa Xeerka La Casriyeeyay ee Oregon (ORS) 338.

Waa maxay xiriirka ka dhexeeya dugsiyada madaxa bannaan iyo PSS?

PPS ayaa ka mas'uul ah kor kala socoshada iyo kormeerka dhammaan dugsiyada madaxa bannaan ee ay damaanad qaaday degmadu. PPS waxay ururisaa waxyaabaha sanadlaha ah ee la iskaga baahan yahay in la bixiyo, waxay la socotaa xasiloonida maaliyadeed iyo waxqabadka ardayga, waxayna hubisaa in dugsiga madaxa bannaani uu u hoggaansan yahay sharciga iyo heshiiska.

Sidee ayuu ardaygu isku qoraa dugsiga madaxa bannaan?

Isqorista dugsiga madaxa bannaan waa in ay ahaataa mid caddaalad ah isla markaana loo siman yahay, waxaana laga yaabaa in ay ku kooban tahay da'da ardayga, heerka fasal ee ardayga, iyo booska bannaan ee jira. Haddii dugsiga madaxa bannaani uu helo codsiyo ka badan booska bannaan ee jira marka la eego heerka fasalka/fasalka la joogo, markaasi waa in loo sameeyaa bakhtiyaanasiib loo siman yahay si loo go'aamiyo isqorista heerka fasalka/fasalka la joogo.

Hawsha Habka Waxbarida Faransiiska ee Dugsiga Dadweynaha ee Madaxa bannaan ee Le Mende wuxuu bixiyaa barnaamijka habka wax barid oo buuxa oo uu Faransiisku yahay luqadda muhiimada la siinayo. Manhajku waa mid dhammeystiran, oo leh xisaab, saynis iyo waxbarashada dhanka luqadda oo xoogan oo la isticmaalayo hab waxbarasho oo castri ah oo ka socda adduunka oo idil. Le Monde wuxuu muhiimada siiyaa guusha tacliimeed, koritaanka shaqsi, iyo mas'uuliyadda bulsho si arday kasta loogu diyaariyo ka qayb qaadashada buuxda ee ee bulshadeena adduunka.

